Kala Saaruhu, Muu isa Saaro?

W/Q Idiris M. Cali

May 29, 2010

Arar: Haddii la'iska illoobey, ammaba laga nastay, dooddii la marooriyey ee ku saabsanayd "taariikhaynta" aqoonta Miisaanka Maansada Soomaaliyeed (MMS), waxa ay doodi ka aloosantahay "kala sarraysiinta" labada aragtiyood---oo uu midna B.Sare. Carraale hindisay, midda kalena uu Abwaan Gaarriye hindisay---ee dhidibyada u ah MMS. Haddaba, waxa dooddan cusub, inta aan ka garanayo, iba-furay C/raxmaan Faarax "Barwaaqo" kadib markii uu soo saaaray qoraalka uu kaga jawaabayo weydiinta: "Aragtida Carraale iyo ta Gaarriye ee miisaanka maansadu iyamaa mucweyn?" Sidii horeba looga bartay baanisihiisa ku aaddan dooddii tan dambe ka doorroonayd, ee lagu ogaanayey daahfuraha miisaanka maansada, waxa uu Barwaaqo dhayalsaday aqoonta baaxadda weyn ee MMS ee uu B.Sare. Carraale ku fara-yaraystay, waxa uuna Barwaaqo si' buuxda garbaha u saaray aragtida Abwaan Gaarriye. Si' kastaba ha ahaatee, waxa aan qoraalkan gaaban idinku tusi doonaa in labada arigtiyood ee B.Sare Carraale iyo Awbaan Gaarriye ay ul iyo diir yihiin, haba kala giijisnaadeene.

Hordhac: Afka iyo Arooristiisa[1]

Ummada Soomaaliyeed erayga "af" laba macne ayuu ugu fadhiyaa. 1) af oo ah xubin wax lagu cuno, iyo 2) af oo ah xubin xiriir. Maaddaama oo daymada kaliyah lagu garan karo waxa uu yahay "afka wax lagu cuno," waxa loo baahanayaa aqoon baadhitaan si' loo garto waxa uu yahay "afka wax xiriiriya." Haddaba, afka wax xiriiriya waxa daalaciya affar habdhis amma xeer oo kala ah: Xeerka codka, xeerka erayga, xeerka macnaha iyo xeerka naxwaha[2]. Xeerarkan ka sokow, waxa afka wax xiriiriya lagu dhuuxi karaa aqoonta "Aroorka Afka," oo ah abla-ablayn lagu baadhayo sida uu afka wax xiriiriyaayi raad ugu leeyahay xiriir kasta oo dhaca. Haddaba, aroorka afkow maxaad tahay?

Aroorka afka—sidoo kalena loo yaqaan "abla-ablaynta afka"—waa aqoon lagaga baaraandago qaybaha xiriirsan (ee is-hoos-galka ah) ee uu afku ku salaysanyahay. Aroorka afka ayaa ugu horrayn ka biya-dhaca afka [oo ah xiriir ku dhisan erayo macno ku qotoma oo la is dhaaf-dhaafsado, lehna xeerar shaxan (sida: xeerka naxwaha iyo xeerka codka), kuna shuban garaadka aadanaha---uummanaha intiisa kale ee aynu badanka isha kaga bogan karro ma laha xiriir ku dhisan af amma luuqad si' heer sare ah u habaysan, luuqaddaas oo wada yeelan karta hab-dhisyada luuqad ka mid ah luuqadaha aadanuhu leedahay]. Isla afka waxaa ka sii burqama laba hab oo kala ah: hadal iyo hawraar**.**

Hadalku waa xiriirka *daysan* ee afka, halka ay hawraari ka tahay xiriirka *dabran* (amma xeeri-xejista ah) ee afka. Sidaas daraadeed, hadalku waa hadaaqis "aan taawo iyo tab adag toona loo cuskanin"[3] iraahshihiisa. Balse, hawraari aad ayey uga duwantahay hadalka; waxa ayna hawraari leedahay abdo sarraysa—badankana kayd-gal ah.

Waxa hadalka ku soo aroora, amma ku hoos-taxma, qaybaha kala ah: af-suuqdiga (badanaa dhalinyaradu aadka u isticmaasho; tusaale: "Axmed wuu ka sii daayey," iwm.), af-shimbireedka (ay dar gaar ihi uun isla garan taqaan), lahjadaynta, ikk. Qaybahan saddexda ah iyo kuwa kale ee hadalka macno

Copyright © 2010 WardheerNews.com

buuxa waa ay sameyn karaan; balse qaybahani gabi waa hadal-maalmeed faa'idadoodu ku sar-go'antahay isla xilliga la'adeegsanayo—sababta oo ah, taariikh ma sunki karaan illaa la hawraareeyo.

Waxa hadalka ka duwan hawraarta, oo iyadu abbaar sugan leh; waxa ayna u kala qaybsantaa**:** soogaan[4] iyo suugaan. Waa ta' hora e, soogaantu waa tiraab tusmayn sharraxan leh; badankana aad uga fog khayaalka, sababta oo ah soogaantu waa qaybta hawraartanka ah ee loo adeegsado kutub-qorista, kutubtaas oo ku yimaadda aqoon ku dhisan baadhis heer kulliyadeed ah. Waxaana soogaanta kamid ah: war-bixinta sahameed, xog-jeedinta, war-sheegga, iwm.

Dhanka kale, suugaantu waa hawraartanka tixeed amma tiraabeed ee badanaa ku tusmaysan murtida iyo maansada. Sidoo kalena, ayada oo run iyo hummaag farshaxaneed oo "alifaad" ah ku dhisan, suugaantu waa kaydka—hiddaha iyo dhaqanka—oraaheed (amma qoraaleed) ee ay bulsho kulansato; sidaas daraadeedna suugaantu waa hawraartan xeer leh.

Haddaba, suugaantu waxa ay ka soohantahay eray[5] iyo or. Suugaanta erayga ahna waxa loo sii kala qaadaa tix iyo tiraab. Tixda jiritaankeeda waxa xeer u ah yeelashada dawliil [xaraf-raac, tidcin, iyo miisaan] iyo dabuub (murti) ay yeeshaan unugyo kasta oo tixda ku aroora. Waxaana unugyadan ka mid ah maansada iyo murtida maansaysan. Dhanka kale, tiraabta waxa jiritaankeeda shardi u ah dabuub [murti (oo iyadu yeelata: duluc (dhex-taal), maahmaah, hal-hays, hal-xiraale, hal-qabsi, hal-ku-dheg, i.w.m.)] kaliyah; waxa ayna tiraabi ku meel-martaa adeegsashada hawraartanka habboon, ee ka sifaysan *hadalka*. Tiraabta unugyadeedana waxaa ka mid ah: falanqaha, baanisaha, gorfaynta, faallada, faaqidaadda, sheeka-curinta, curiska, ikk. Tiraabtu, sidoo kale, waxa ay qayb ka noqon kartaa hawraartanka soogaanta; sababta oo ah warbixinnada sahammeed ee "murtida" miiran ah waa tiraab.

Haddii suugaanta eraygeedu sidaa u qaabaysmo, suugaanta orteedu waa suugaanta eraygeeda oo ay jaan iyo jiibini weheliso. Sidaas daraadeed, ciyaar-dhaqameedyada, oo ku kala firirsan deegaan walba oo Soomaaliyeed, waxa ay ka mid yihiin suugaanta. *Inta badan*, ortu waa laxanga tixda; gaar ahaan ortu waa laxanka maansada. Tanina waxay daliil u tahay in maanso kasta ay hees danan leh isu baddali karto, mar haddii laxan la saaro miraha (erayada) maansadaas. Waxa tanna ka sii duxay: Gabayga, oo ah maanso aad u cabbaysan, ayaa saddexda luuq ee loo qaadi karo midi tahay hees-dhaqameed, oo iyada oo mirihii gabayga lagu dhawaaqayo ayaa haddana hees la qaadayaa. [Labada luuq ee kale midi waa Guurow, midina waa luuqda Galbeediga ah.] Laba luuq oo kamid ah saddexdan luuq ee gabayga waxa ay ku summadaysanyihiin sargooyooyinkan:

1. Hooyaalayeey hooyaalayeey, hoyalayeey hoobe (Luuqda Galbeediga ah ee Gabayga)
2. Hoobaale hoobaalayow; hobalayow heedhe (Luuqda Hees-dhaqameedda ee Gabayga)

Haddaba, annaga oo hoos ugu sii daaddagayna tixda, aan u kuur galno waxa ay maansadu tahay. Maansadu waa xubin-tixeed tayo sare u leh tebinta aragtiyada iyo xogo-rumeedyada ku duugan heer-nololeedka xilli-qaaran ee ay bulsho leedahay—gaar ahaanna, bulshada Soomaalidu leedahay. Sidaas awgeedna, maansadu waxa ay *qarniyo*[4] badan ahayd kaydka ugu cufan ee suugaanta; suugaantaas oo ahayd mid oraaheed intii aan af-Soomaaligaba qoraal loo helin.

Copyright © 2010 WardheerNews.com



Jaantus 1. Aroorka Afka

I. Maansada iyo Aragtiyada Miisaama

Haddii aynu ka sii amba-qaadno aroorka afka, waxa aynu eegga u dhaadhacaynaa maansada iyo gorfaynteeda. Samays ahaan, maansadu marwalba waa hoor leh farshaxan u shubma meeris meeris [meeriskuna uma samaysna sida weedh oo kale]. Meeris kasta oo maanso ahna waxa uu yeeshaa xaraf-raac iyo dheellitir ka dhaxeeya wadarta shaqal-dheere iyo tan dhawaqa (alan) ee isla meeriska. Kolka dhawr meeris oo isku duluc iyo isku xaraf-raac ah ay is raacaan, is hoos taxmaan, dhammaantoodna ay ka simanyihiin tiro go'an oo shaqallo ah, waxa dhasha tuduc ah xidhmo maanso ah. Haddii ay dhawr tudcoodi saas isku raacaanna, waxa dhasha maanso ku dhisan hal xaraf-qaad (maansooyinka haweenka siiba Buraanburka waxa laga helaa dhawr xaraf-qaad oo kala duwan). Ugu dambaynna, maansadaas curantay waa in ay ujeeddo mug-weyn ku qotontaa, si' wakhti-dhuubanna uga warantaa mawduuc hadalku duxda ka qaadi lahaa (amma waa in ay murti rib ah yeelataa).

Haddaba, waxaa jira dhawriyo-toban waji oo ay maansadu u kala bax-baxdo. Ka soo qaad in ay maansadu tahay geed kamid ah geedaha tixda ee goofka eray-suugaanta, kolkaas waji kasta oo maansada kamid ahna waxa uu noqonayaa laan ku dheggan geedka maansada. Laamaha (amma wajiyada) maansada ee illaa haddeer la magcaabi karo waxaa kamid ah: Gabayga/Guurowga, Buraanburka (oo dhawr laamood ah), Masafada, Dhaantada/Heellada/Wiglada/Hirwada, Geeraarka (oo isna dhawr laamood ah), Heesta-dhallaanka/Saarka, Heesta-haanta/Baarcaddaha, Jiiftada/Batarka, Heello-gaab/Heesta-maroodiga, Heesta-xoolaha, Heesta-dabangaallaha, Heesta-shimbiraha, iyo Heesta-mooyyaha. Laan kasta oo maanso ahna waxa ay laan kaloo maanso ah dheertahay amma ka-dhimantahay waa hal shaqal gaab. Kol haddii shaqallada laamaha maansada faraha lala galo, oo la taabtaabtana, waxaa lagu dhex siibanayaa waadiga Miisaanka Maansada Soomaaliyeed.

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed (MMS)—oo asal ahaan maansoyahan kasta laabtiisa xag-Alluun ugu daabacan, balse badhtanaadkii 1970neeyadii si' daalac leh ugu soo if-baxay qoraallada iyo daraasadaha B.Sare. Cabdillaahi Diiriye Guuleed "Carraale" iyo Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye," sidoo kalena waxa MMS sii bal-balaadhiyey Culimada Hiddaha iyo Dhaqanka ee Jabuuti oo uu hor-kacayo Maxamed C/laahi Riiraash—waxa uu xarako u yahay, oo uu kala nidaamiyaa, maansooyinka ku aroora eray-suugaanta hawraartanka afka Soomaaliga. Sidoo kale, MMS waa furaha dhismaha meeris kasta oo maanso ah. Haddaba aan eegno aragtiyada ugu horreeyay ee labada ah ee habkan MMS asla. Balse marka hore, si' aynu isu barno labadan aragtiyood waxa lagama maarmaan ah garashada erayadan qeexan, oo uu badidood erey-bixiyey B.Sare. Carraale:

Copyright © 2010 WardheerNews.com

Meeris: Sadar ama beydka maansada
Hojis: Qaarka hore ee meeriska gabayga
Hooris: Qaarka dambe ee yar ee meeriska gabayga
Alan (dhawaq): Shaqalka oo dheer iyo gaabba ay simanyihiin: A, EE, I, OO, U
Shaqal-dheere: Waad taqaan oo waa: AA, EE, II, OO, UU
Dhafane: Waxa uu *badanka* u dhigmaa shaqal-dheeraha (mararka qaarna shaqal-gaabka), waana: AY, OW, AW, EY…

I.i. Aragtida Abwaan Gaarriye ee MMS

Aragtida Abwaan Gaarriye waxa ay ku urusantahay murtida ah: tirinta shaqallada meeriska, iyada oo la adeegsanayo tirooyin boos celis u ah shaqallada dhaadheer (#2) iyo kuwa gaaggaaban (#1), kadibna wadarta tirooyinkani ay muujinayso wajiga uu meeriskaasu ka yahay maanso. Tusaale:

Gaaroodi iyo waa la tegi, buurihii Golise
2 2 1 1 1 2 1 1 1, 2 1 2 1 1 1 (wadar: 20 shaqal → Gabay)
Gudiyeey i maqal waxad tihiin, gacaladaydiiye
1 1 2 1 1 1 1 1 2, 1 1 1 2 2 1 (wadar: 20 shaqal → Gabay)

Sida muuqata, labadaas meeris ee kore dad weynaha badidiis waa isugu mid, waayo labada meeris ee kore waa meerisyo kuwada jira isla hal gabay oo uu ruux qudha tiriyey: Sayyid Maxamed C. Xassan. Balse qofkii in yar uun sii dhugta kala duwanaanshaha labadaas meeris, waxa uu markiiba gaadhayaa go'aan ah: "War labada meeris kama sinna tirada shaqallada dhaadheer, oo midka kore wuxuu sitaa 5 shaqal oo dhaadheer, kan hoosana 4 shaqal oo dhaadheer e, ee talow waa maxay sababtu." Sida xaqiiqada ahna, Awaan Gaarriye kama faalloon sababta loo raadin karo kala duwanaanshaha meerisyadan. Sababta oo ah, Abwaan Gaarriye ma adeegsan eray-bixinta "alanka" kaas oo ku iman kara furfuris lagu sii sameeyo meeris walba oo maanso ah. Si' kastaba ha ahaatee, aragtida Abwaan Gaarriye waxa ay doog ku leedahay kala asoorka maansooyinka, oo ay maanso waliba bad ku dartaa, waayo maansooyinka waxa kala kaxeeya, oo midna jiifto ka dhiga midna gabay, waa shaqallada uu meerisku qaadan karo oo cayiman. Tusaale ahaan:

Marka hore dad baan ahay
1 1 1 1 1 2 1 1 (9 shaqal → jiifto)
U xayta u xiira
1 2 1 1 2 1 (8 shaqal → heello-gaab, amma heesta-maroogida: *Maroodi Cadhoole*)
Laab dooxantaad
2 2 1 2 (7 shaqal → heesta-xoolaha, sida heesta-geela, -maqasha, -lo'da, i.w.m.)
Ma cunaayee
1 1 2 2 (6 shaqal → heesta-dabangaallaha: *Dabangaallaha / Tamayuluqaha*, ...)

Iyada oa ay sidaa tahay, aragtida Abwaan Gaarriye waxa ay tibaaxdaa in uu jiro shaqal-gaab faqad ku ah meerisyo kamid ah maanso soocan, sida jiiftada i.w.m., waxa uuna shaqalkani meeriskii saggaalaha ahaa ee jiiftada ka dhigayaa mid toban le ah. Sidaa si' lamidana, haddii uu shaqal ka dhimanyahay meerisyada maanso soocan, waxa dhacda in ay meerisyadani galayaan maanso kale.

Copyright © 2010 WardheerNews.com

Dabcan, aragtida Abwaan Gaarriye waxa ay si nugul u faagtaa waxa meeriska maansada jebiya, iyada oo uu Abwaan Gaarriye sameeyay erey-bixinta “xundhur.” Xundhurtu waa shaqalka ku jira meeriska maanso kasta ee aan hoggiisa ka riixmin. Tusaale:

Haaneedka siisee
2 2 (1) 2 2

Shaqalka gaaban ee dhexda ku jira marnaba inuu riixmo waa mamnuuc. Waayo meeriskaas jiiftada ihi waa uu jabayaa. Tusaale: *Waataan soo idhi*, oo ah meeris jaban, ahna hadal iska caadi ah. Si kale haddii aan u dhigo, shaqalka dhexda ku jira ee meeriska jiiftadu mar walba waa in uu yahay shaqal-shanaad. Dhinaca gabayga waxa jira affar xundhurood, kuwaas oo meeriska ka kala dagaya hogga 5aad, 10aad, 15aad iyo 20aad.

Haddaan soo koobo, aragtida Abwaan Gaarriye runtii waxa ay daboolaysaa baahida loo qabo kala garashada laamaha maansada iyo waliba in uu meerisku tooso. Waxa ay se aragtidani ka amuumantahay magac-bixinta meeriska ee heerka farraarada, magac-bixintan oo sahasha habaynta meerisyada.

I.ii Aragtida B.Sare. Carraale ee MMS

Aragtida B.Sare. Carraale waxa ay ugu horrayn ka duulaysaa dulucda MMS, iyada oo odhanaysa:

I.ii.a. Waa in ay jirtaa dheellitir ka dhaxaysa tirada alanada iyo tan shaqal-dheeraha ee meeriska
I.ii.b. Waa in ay shaqal-dheerayaashu meelo sugan ka dagaan meeriska

Labadan qodob amma xeer ee uu B.Sare. Carraale ka soo dhex-miiqay dhiska maansada, kadib markii uu ururiyey kumanaan meeris oo gabay iyo maanso kaleba ah, si wacanna u dersay dhiskooda, ayaa ah laba xeer oo aan kala hadhi karin.

I.ii.a. Qodobka koowaad: Dheellitirka

Waxa uu B.Sare. Carraale ugu horrayn meeriska laan-maanso kasta u qaybiyey: Meeris-saleed iyo Meeris-farcaneed, kaas oo dhasha marka meeriska saleed hal shaqal gaab la raaciyo. Waxa uuna meeriska saleed u sii kala qaybiyay jaadad dhawr ah. Sidoo kalena, meeriska farcanka ah waxa uu u sii kala qaybiyay dhawr jaad. Jaadadkan amma qaababkan meeriseed ayuu haddaba B.Sare. Carraale u qabatimay tirooyin ah magac-xisaabeedyo lagu sooco, sida toddobo-shanle (7,5), siddeed-halle (8,1) i.w.m., waxa uuna meeris walba hordhigay tirooyinkan qawska ku jira si’ loo garto meeriska laga hadlayo summada uu wato. Waxa uuna tibaaxay in wadarka labadan tiro ee qawska kuwada jira ay muujinayso inta shaqallo gaaggaaban ah ee uu meerisku wato. Tusaale:

(14,7) Adaa koofilow jiitayaan, dunida joogayne
(9,0) Garta madal ka naqi kara

Ugu horrayn, wadarta (14+7) waa 21, tanina macnaheedu waa in uu meeriska kore yahay meeris gabay ah oo ah meeris farcan ah, waayo waxa uu ku dhismay 21 shaqal, halka meeriska saleed ee gabayga ihi

Copyright © 2010 WardheerNews.com

uu mar walba ku dhismo 20 shaqal. Meeriska hoosta jira waa jiifto, waayo wadarta (9+0) waa 9, meeriskanina waa meeris sal ah. Haddii la macneeyona, tirada 14 amma 9 amma sideedaba tirada weyn ee labada tiro ee qawska ku wada jira waxa ay u taagantahay tirada alanada ee meeriska. Dhanka kale, tirada yar ee 7 iyo 0 waxa ay u taagantahay tirada shaqal-dheerayaasha ee meeriska. Tusaale kale ayaa ah:

Gal-la-da-ha-l-laa-hay-ka-ba-dan, gee-da-haas-ba-xa-e -- (16 alan; 4 shaqal-dheere)
Geed-joo-go-hoo-dii-had-daan, gud-i-ri-gow-loo-gay -- (13 alan; 7 shaqal-dheere)

Haddaba marka qodobka koowaad ee aragtida B.Sare. Carraale ee MMS la adeegsado, inta meeris saleed ee uu gabaygu yeelan karo waa:

(13,7) Deeqii Illaahay halkuu, xuliyey daadkiisa
(14,6) Gaaraabidhaan baa ku haga, goor habeennimo e
(15,5) Toddobaatan boqol oo darwiish, togatey neef doora
(16,4) Dhafaruur dhunkaal lagu qasiyo, dhayga badhidiisa
(17,3) Qummud iyo baruuriyo legiyo, qawdhihii kuruska
(18,2) Bari dahab waxa ku jira ma rabo, Baashe baa yidhiye

Sidoo kale inta meeris farcaneed ee uu gabaygu yeelan karo waa:

(14,7) Adaa Koofilow jiitayaan, dunida joogayne
(15,6) Markuu duubi weynow indhaha, debbada soo joojo
(16,5) Ragow kibirka waa lagu kufaa, kaa' halla-ogaado
(17,4) Xurfadaha gumaysigu qotiyo, dabinku xoodaayo
(18,3) Gallad nimaan ka qabo laguma oga, gebiga Daaroode
(19,2) Madaxi sida shacabku rabo ka tage, umana toosaane

Toddobadaas jaad ayuun buu meeriska gabaygu u dhismaa. Haddaba, toddobadaas jaad waa farraarro ka mid ah laan-gabayga maansada. Farraarrada laftooda markii lasii kala furfuro, waxa dhalanaya caleemo ku kala taxmaya farraar kasta---lakiin B.Sare. Carraale ma sii kala qaadqaadin waxa ay caleemahani yihiin; balse caleemahan qaababka ay yihiin waxa aad si damman ugu arkaysaa aragtida Abwaan Gaarriye. Hasayeeshee, waxa ay aragtida B.Sare. Carraale durbadiiba jihaysay in ay jiraan dhawr jaad oo uu meeriska gabayga ihi u dhismo, iyada oo ay aragtida Abwaan Gaarriye ka gaabsatay falanqaynta amma xeerinta jaadadkan.

Waxa is weydiin mudan, sababta toddobadaas cayn oo qudha looga helay in uu meeriskii gabayga ahaa ku sifoobo. Jawaabtana waxa kolkiiba bixiyey aragtida B.Sare. Carraale, oo isagu meeriska gabayga si dheer u gorfeeyay.

Waxa uu B.Sare. Carraale meeriska gabayga ah u qaybiyey laba qaybood: Hojis iyo hooris. Waxa uuna muujiyey in hooriska mar walba uu qaato 6 alan oo ay weheliyaan laba shaqal-dheere, hojiskana uu qaato 13 alan kolka uu hojisku kamid yahay meeris farcan ah, haddii kalena 12 alan. Tusaale:

Copyright © 2010 WardheerNews.com

[12] (8,4) Soddon baarro soogaan darmaan (hojis - sal) | (6,2) salaba guud dheer leh (hooris)
[13] (9,4) Markuu duubi weynow indhaha (hojis - farcan), | (6,2) debadda soo joojo (hooris)

Ka jawaabista sababta uu meeriska saleed (amma farcaneed) ee gabayga ihi u yeeshay toddobada jaad ayaa ah:

1) in uusan jirin meeris ka alano yar meeriska (13,7) [amma kan (14,7)] ee gabayga, oo aragtida Abwaan Gaarriye ayaa diidaysa in meeriska afartiisa xundhurood, siiba labada ku jira hojiska meeriska, in ay shaqallo dhaadheer isu baddalaan, si' loo sameeyo meeris ka alano yar meeriska saleed ee gabayga ee saddexiyo-toban-toddobaalaha ah . Haddiiba la sameeyo meeris ka alano yar meeriska (13,7), iyada oo aan qodobka koowaad ee B.Sare. Carraale aan la burinahayn, waxa uu noqonayaa sidatan:

(12,8) Baabuurkii xiimaayey, Bari u raaceene

Sida aannu wada arki doonno, meeriskan waxa burin doona qodobka labaad ee B.Sare Carraale. Sidaas daraadeedna, meeriskan in lagu daro tiradii toddobada ahayd ee uu meeriska saleed ee gabayga ihi ku suurtoobayey waa khalad.

2) Dhanka kale, haddii la sameen lahaa meeris ka alano badan meeriska (18,2) amma (19,2), waxa hubaal ah in aragtida B.Sare. Carraale ay xadiday inta shaqal-dheere ee meeriska gabayga ah hooriskiisa degaya. Waxa ayna shaqal-dheerayaashanu yihiin laba kaliya, oo labadan shaqal-dheere lama sii jajabin karo. Hannaanka ay shaqal-dheerayaashanu u degayaan hooriska ayaa waxa lagu faahfaahiyey qodobka labaad ee aragtida B.Sare. Carraale ee miisaanka maansada.

I.ii.b. Qodobka labaad: Hogagga Shaqal-dheerayaasha ee Meeriska

B.Sare Carraale waxa uu qeexay meelaha ay shaqal-dheerayaashu ka degayaan meeriska maansada. Tusaale ahaan, meeriska gabayga, kolka muuqaal ahaan lagu muujiyo jaantusmeedka hoose, waxa uu u qaabaysmayaa:

(12,8) W W V W W V W, W V W W V -- Laan-gabay

Sida jaanta kore ku cad, xarafka "W" waxa uu u taaganyahay shaqal-dheere kolka la kala badho noqonaya laba "V" oo u taagan shaqal-gaab. Isla jaantaas, dhanka hojiska wax ka xuni ma jiro, balse dhanka hooriska waxa ka muuqda saddex "W." Lakiin xaqiiqadu waa in mar walba mid kamid ah saddexdan "W" ay kala jabaan, si'uu hoorisku u yeesho lix alan, waayo sida jaanta ka muuqata waxa uu hoorisku wataa 5 alan. Si haddaba loo muujiyo meeriska farcanka ah ee gabayga, waxa la qaatay in jaantuskaa kore habkan loo dhigo:

[13,8] (V) W W V W W V W, W V W W V -- Laan-gabay

Haddaba, qodobkan labaad ee aragtida B.Sare Carraale sida xaqiiqadu tahay waxa uu si' hufan u muuqaalinayaa hogagga ay shaqallada gaaggaabani leeyihiin, oo aysan marnaba ka riixmi kerin. Haddii la damco in la taxo toddobadii nooc ee uu meeriska gabayga ihi u samaysnaa, waxa la furfuri karaa isla

Copyright © 2010 WardheerNews.com

jaanta kore, oo marka hal shaqal-dheere la kala badhaba waxa dhalanaya nooc (amma farraar) cusub oo laan-gabay ah, iyada oo aan marnaba la kala badheen labo shaqal-dheere oo ku jira hooriska. Kolka haddaba la baadho inta nooc ee uu hoorisku u samaysmo, waxa ay aragtida B.Sare Carraale dhigaysaa saddexdan nooc:

(6,2) Galiya laabtiina -- V V V W W V
(6,2) Goobo galinaaya -- W V V V W V
(6,2) Goobataal noqo e -- W V W V V V

Saddexdaas nooc uun buu hooriska gabayga ihi u suubsami karaa. Haddii la doono hojiskana, si fudud ayaa inta qaab ee uu u suubsami karo loo ogaan karaa. Haddii aan taxno qaababka hojisyada gabaygu waa:

[Tirooyinka ka horeeya hojis walba waxa ay tusmeenayaan inta shaqal-dheere ee hojiska dhexdiisa ku kala jabi kara, iyo waliba godadka ay shaqal-dheerayaasha kala jabayaayi leeyihiin. U fiirso 1.2 mecnaheedu waa: hojiska laba shaqal-dheere ayaa ku kala jabay: midi waa shaqal-dheeraha koobaad, midina waa shaqal-dheeraha labaad.]

Toddoba-Shanle (7,5): Toddobo shanluhu waa hojis ah farraar "hal" qaab leh. Sidaas awgeed, shaqal-dheerayaasha hojisku ma kala jabayaan:

0. W W V W W V W -- Daacuunku meeshuu ku layn, …

Siddeed-Afarre (8,4): Siddeed afarruhu waa "shan" qaable. Halkan, hojiska hal shaqal-dheere ayaa kala jaba. U fiirso, sababta uu hojiskani shanta qaab u yeeshay waa in shantii shaqal-dheere een hojiskii todobba shanlaha ahaa dhexdiisa ku kala jabin marba midi kala jabi doono:

1. V V W V W W V W -- Annagoo Taleex naal jihaad, …
2. W V V V W W V W -- Saw magani tii gaabsataan, …
3. W W V V V W V W -- Dawdii ha darandoorriyeen, …
4. W W V W V V V W -- Waayeelka dhaylada sitee, …
5. W W V W W V V V -- Gaaraabidhaan baa ku haga, …

Sagaal-Saddexle (9,3): Sagaal saddexlaha "toban" qaab ayaa loo dhisaa, sidaasna waxa uu ku yahay hojis firaaqo badan leh. Halkan, hojiska waxa la kala jabinayaa laba shaqal-dheere.

1.2 V V V V V W W V W -- Isuma fayno laakiin dagaal,…
1.3 V V W V V V W V W -- Toddobaatan boqol oo Darwiish,…
1.4 V V W V W V V V W --Ta aqoonta loo gado baree,…
1.5 V V W V W W V V V -- Cilmigaa asaageedu gayo,…
2.3 W V V V V V W V W -- Caawana hiyiba waa hiyee,…
2.4 W V V V W V V V W -- Haadkiyo waraabuhu ragguu,…
2.5 W V V V W W V V V -- Caawana bal aan meel ka saro,…
3.4 W W V V V V V V W -- Eebbow kufriga gedefta lay,…

Copyright © 2010 WardheerNews.com

3.5 W W V V V W V V V -- Gaaroodi iyo waa la tegi,…
4.5 W W V W V V V V V -- Qoomkii is xaasida nicmadu,…

Toban-labaale (10,2): Toban labaaluhu sida sagaal saddexlaha ayuu “toban” qaab leeyahay. Imika saddex shaqal-dheere ayaa kala jabaya si uu hojisku u yeesho laba shaqal-dheere oo qudha.

1.2.3 V V V V V V W V W -- Gudcurkiyo caddadu waa midkaan,…
1.2.4 V V V V V W V V V W -- Gumuc kama dunnayn iyo rasaas,…
1.2.5 V V V V V W W V V V -- Gigta hore Ismaaciil Mireba,…
1.3.4 V V W V V V V V V W -- Gembi wawgu ridi fulayadii,…
1.3.5 V V W V V V W V V V -- Dhaladuu wax iga saaray culus,…
1.4.5 V V W V W V V V V V -- Ninba goonnidiis keli ra’yiga,…
2.3.4 W V V V V V V V V W -- Baallacad kalyaha kuma jareen,…
2.3.5 W V V V V V W V V V -- Waa gelengal nimankii fadhiyey ,…
2.4.5 W V V V W V V V V V -- Dhaawuca ninkuu ku cusub yahay,…
3.4.5 W W V V V V V V V V -- Waataan margiyadana ku jaro,…

Kowiyo-toban-Halle (11,1): Kowiyo-toban halluhu sida sideed afarraha ayuu shan qaab oo qudha ku dhismaa. Markan affar shaqal-dheere ayaa hojiska laga kala jabinayaa.

1.2.3.4 V V V V V V V V V W -- Kuwa miciyo weyti ah wataa,…
1.2.3.5 V V V V V V V W V V V -- Qabri-Daharre mar un baad xarago,…
1.2.4.5 V V V V V W V V V V V -- Ha ku guban dheh waa guluc shishiyo,…
1.3.4.5 V V W V V V V V V V -- Bad kalluun ku jira kolay ku tahay,…
2.3.4.5 W V V V V V V V V V -- Waa dadka madaxa cudurka silan,…

Labiyo-toban-Eberre (12,0): Sida toddobo shanlaha oo kale, labiyo-toban eberruhu waa “hal” qaable. Ugu dambayn, hojiska labiyo-toban eberruhu dhammaan shaqal-dheereyaashu way kala jabayaan.

1.2.3.4.5 V V V V V V V V V V V -- Hadda daya nimanka garabka madhan,…

Haddaba, qodobka labaad ee aragtida B.Sare Carraale waxa uu maansada laamaheeda oo dhan u solaa sida uu laantaas gabayga ah u solay, ugana dhigay sixinta. Meeris farcan ah iyo mid sal ahba, qodobkan labaadi waa kii dhab ahaan muujiya in meerisyadaasu cuddoonyihiin iyo in kale. Haddii uu meeris laaxin ku jirana, qodobka labaad waa kii soo saara isla meesha laaxinku meeriska kaga jiro. Dhanka kale, bal haddii hal shaqal-dheere hojiska bar uu ku lahaa ka baxo, waxa dhacda in hojiska laaxinka ku jira awgeed awooddii maanso is dhinto. Tusaale:

(10,2) V V V V V V W V W -- Qaran dumay duliyo hoos markuu,... (hojis gabay)
(10,2) V W V V V V V V V W -- Markuu dumay qaran duliyo hoos (baa) -- (meeris dhaanto)

Sidoo kale haddii shaqal-dheerayaasha meeshii ay ku habboonaayeen ee ay jaanta hojiska gabayga ihi ina tusayso loo celiyo, isla markaasna shaqallada xundhuraha ah iyagana bartoodii lagu hubsado, hojisku

Copyright © 2010 WardheerNews.com

waxa uu ku soo noqonayaa awooddiisii gabay. Tusaale ahaan, amma sida uu B.Sare Carraale u tusaaleeyay:

(8,4) V W V V W V W W -- Wardheer dalwanaagsanaydaa -- (meeris heello)
(8,4) V V W V W W V W -- Dal wanaagsanaydaa wardheer, ... (hojis gabay)

Halkaas waxa inooga cad in sida qodobka labaadi dhigayo mar walba loo maro dhisidda meeriska gabayga ah. Sida jaanta ku cadna, ma bannaana in shaqal-dheerayaashu hogaggooga inta ay ka riixmaan haddana dhex degaan laba shaqal oo gaaggaab. Balse inay shaqal-dheerayaashu dawaafaan, oo intii uga cayiman jaanta siday doonaan u dagaan waa waxa badiyay caleemaha laanta gabayga ah ee ka dhigay 64ka qaab (meeris saleed iyo mid farcan ahba). Waxa ay tani macnaheedu tahay in maansadu ciriiri ahayn, haddii aanay erayadu cuslaynin. Waayo, waxa daliil tan u ah, kadib markii uu B.Sare. Carraale ina hordhigay qodobo door ah oo meeriska laxniga looga saari karo. Sida: Ha'da iyo alanka ay wadato oo la qariyo, si alannadu u yaraadaan. Tusaale: "Cidii duminaayo" oo laga wado "Cidihii duminaayo." Gabyaayadu si xeel-dheer ayey u la socdaan qarinta allanada noocan oo kale ah. Balse gabyaayada qaar ayaan qarin, tanna macnaheedu maaha gabyaayada ayaa saxsan, ee luuqda gabyaayada qaar ayaa sahasha in uusan laxnigu muuqan. Tusaale,

(16,5) Degmadeena oo idil haddi aan, deyay abwaabteeda

Oo uu mar dambana Allah-haw-naxariistee C/laahi Suldaan Maxamed (Timacadde) sidan u saxay:

(15,5) Degmadeena oo idil haddaan, deyay abwaabteeda

Sababta dhabta ah ee uusan laxnigu si' aada uga muuqan meeriska kore ayaa ah in meerisku yahay mid farcan ah, oo awelba ku saxsanaa qodobka koowaad ee xeerarka B.Sare. Carraale ee MMS.

II. Kala Sarreysiinta Labada Argtiyoodi ma Jirto

Haddaba, sida xaqiiqadu tahay way adagtahay in la kala sarreysiiyo labada argtiyood ee labada macallin. Sababta oo ah, labada aragtiyoodi waxa ay xeerayaan waxa ay maansadu tahay, kolkaasna labaduba waxa u bannaan in la sii kobciyo oo lasii bal-balaadhiyo. Bal-balaadhista labada aragtiyood mar hore ayey ku tallaabsadeen culimada hiddaha iyo dhaqanka ee Jabuuti iyo waliba culimada ajnabiga ah ee reer Galbeedka ah, oo uu kamid yahay qoraha buugga *Heelloy* ee John W. Johnson. Waxa ayna culimada reer Jabuuti soo kordhiyeen eray-bixinno hor leh oo lagu sii lafo guri karo meeriska maanso kasta. Tusaale ahaan, waraaq[6] ay wada qoreen Maxamed C/laahi Riiraash iyo Martin Orwin waxa ay ku xuseen in meeriska gabayga ah oo la kala jajabiyaayi ay ka dhashaan dhammaan maansooyinka toosan. Dhanka eray-bixinta, waxa ay culimada reer Jabuuti xundhurtii shaqal gaabka ahayd u bixiyeen guntin, iyaga oo afarta shaqal ee guntinta ka horeeyana u bixiyey xubin (hadduu hal-shaqal gaabi ka maqan yahay xubinta waa xubin-taban, haday afarteeda shallo gaab wadatana waa xubin togan); taas oo u qaybsanta laba xag oo midiba laba shaqal oo dhaadheer wato, kadibna intaba ku magacaabay waax. Tusaale, uu = W, u =V :

Copyright © 2010 WardheerNews.com



Jaantus 2. Waax

Kolkaas, imika laanta gabaygu waxa ay wadataa affar waaxood oo taas kore u wada eg. Waaxduna waa aas-aaska maanso kasta oo toosan.

Si' kastaba ha ahaatee, waxa wali cad in aragtiyada labada macallin, waa B.Sare. Carraale iyo Abaan Gaarriye'e, eyan wali hadafkoodii seegin, mana seegi karaan. Haddaba, aan ka jawaabo dhawr qodob oo uu Barwaaqo qoraalkiisa ku soo bandhigey, aniga oo qallinka ku xajinaya meelaha iiga baahan oo qudha.

1. Sida uu Barwaaqoba qiray, labada macallin waa ay ka simanyihiin aragtida khusaysa miisaanka maansada, oo hindisahoodu waa dhuuxa MMS.

2. Agabka (oo ah hindisaha aqooneed ee) ay labada aqoonyahan kala adeegsadeed, sida qoraalkan ku cad, ma sinna, sida uu Barwaaqoba qoray. Balse maaha in Abwaan Gaarriye kaga doorroonyahay dhinaca agabka B.Sare. Carraale sida uu Barwaaqo qaatay. Sababta oo ah, B.Sare. Carraale waxa uu adeegsaday qaabka "alanada" iyo dheellitirka shaqal-dheerayaasha, oo runtii ka cufan adeegsiga muuqaalka shaqallada oo tirooyin lagu muujiyo oo qudha. Sidoo kale, B.Sare. Carraale waxa uu dejiyey saddex qodob (oo laba uuni ka aflaxeen) oo maansada lagu saafto. Si' kale haddii aan u dhigo, B.Sare. Carraale waxa uu qaabeeyey xeer, kaas oo aad uga duwan sheegsheegista shaqallo si' fudud loo garwaaqsan karo. Waxa aanan filayaa in uu Barwaaqo fahmi doono waxa laaxinka sameeya inuu noqon karo alannada iyo waliba shaqalka. Mase waxayba ka ahayd deex-su'aaleed (a rhetorical question) markuu intaa na weydiiyey!

3. Waxa uu Barwaaqo qiray in uusan Abwaan Gaarriye samayn erey-bixino door ah, marka laga reebo eryaga "xundhur," balse uu B.Sare Carraale uu alifay erey-bixinno meel mar ah. Eray-bixinnada B.Sare. Carraale uu adeegsaday waxa kamid ah: jilis, meeris, hojis, hooris, alan, dhafanne, ikk. Sida uusan Barwaaqo qabin, muhiimmada erey-bixinnadani nagama caawinayaan in aan fahanno aragtida B.Sare. Carreele oo qudha e, waxa ay naga caawinayaan garashada iyo dhuuxidda Miisaanka Maansada Soomaaliyeed, oo ah xeer u dhigma xeerarka bini-aadamku ka dhex xushay dabeecada kawnka ee uu kamidka yahay xeerka xoogga, i.w.m.

4. Waxa uu Barwaaqo[7] yidhi shuruudaha uu Abwaan Gaarriye uu u adeegsaday MMS waa:

"Shardi 1aad:
Beyd kasta oo jiifto ihi waa inuu noqdo sagaalle ama tobanleey ay xundhurtu isu dheelli tirto.
Shardiga 2aad:
Shaqalladu iskama filiqsana. Waxay isu raacaan hab go'an.
Shardiga 3aad:

Copyright © 2010 WardheerNews.com

Shibbanayaasha isxigsada ama laban-laabmaa meelo gaar ah ayey ku leeyihiin tusaha jiiftada – meel walba ma galaan."

Dhammaan shuruudahaas kore waxa ay ku hoos taxmayaan, oo aad mooddaa in ay bal-balaadhinayaan, labada xeer ee uu B.Sare. Carraale ka dejiyey dhismaha dabiiciga ah ee maansada.

5. Xidhiidhka ka dhaxeeya badaha maansada, sida qoraalkan ku cad, labada macallin isku si' ayey uga manfaco dheliyeen. Mar haddii uu B.Sare. Carraale na garwaaqsiiyey xeerar gebi wada kulmin kara maansooyinka oo dhan, oo uu Abwaan Gaarriyena faahfaahiyey badaha ay maansooyinka kala degayaan, labaduba waa ay ku daadaleen helista ujeeddada ugu weyn ee MMS, oo ah in maansooyinka oo dhan khaanado lagu kala gurguro, oo la garto waxa ay ku kala duwanyihiin, iyo sida ay u kharribanyihiin ama aysan u kharribnayn.

6. Sida ku cad agabka ay kala adeegsadeen labada macallin, qoraalkanna aan ku faahfaahiyey, labaduba waa ay ka simanyihiin helista xogta ugu horraysa ee MMS. Balse sidaan, soo sheegay,faahfaahintooda waxa u istaagay macallimiin kale. Sida uu Barwaaqo u faahfaahiyey hindisaaha Abwaan Gaarriye ee uu qaacidooyin (billaa magac ah) ugu xarriiqay caleemaha laan-maansada jiiftada ayaan annigaba u faahfaahiyey hindisihii B.Sare. Carraale. Sida uu Barwaaqo dhigey, waxa ay jiiftadu leedahay jaadadkan (meeris-saleed ee) soo socda kolka la raaco wadiiqada Abwaan Gaarriye:

2 , 2 (1) 2 2	Soomaali waa duub	11 , 11 (1) 2 2	Ninna kuma helaayee
2 , 2 (1) 2 11	Coon maaha loo hoyan	11 , 11 (1) 2 11	Gobanimada hawl yari
2 , 2 (1) 11 2	Dhuuxaa ka adagoo	11 , 11 (1) 11 2	Wabadar afka u saar
2 , 2 (1) 11 11	Cawro maaha socod badan	11 , 11 (1) 11 11	Waxaraha in lagu qalo
11 , 2 (1) 2 2	Ma cawaa ma caanaa	2 , 11 (1) 2 2	Dhaantiyo ciyaartoo
11, 2 (1) 2 11	Callo maaha liitiya	2 , 11 (1) 2 11	Loo raro dhibaadiyo
11 , 2 (1) 11 2	Ma cug baa ma cigashaa	2 , 11 (1) 11 2	Dhiilladu ka qaraweyn
11 , 2 (1) 11 11	Khamri yaanu idin hodin	2 , 11 (1) 11 11	??

Sidii aan ku soo aragnay hojisyada dhammaan meeris walba oo gabay ah u qoondaysan, jiiftadana meerisyadadeeda oo dhan waaxa lagu cabbiri karaa habka B.Sare. Carraale, habkaas oo uu Barwaaqo sahashaday, kuna simay heerka farraarka. Sida: (6,2), (12,0), i.w.m. Mucdu waa "maaha" in uu B.Sare Carraale u qaabeeyay meeriska jiiftada ah 5 jaad oo *qudha*, ee sida hindisaha Abwaan Gaarriye uu u isticmaalay Barwaaqo ayaa loo baahanyahay in loo isticmaalo hindisaha B.Sare Carraale, oo kolkaasna la muujiyo in meeris-saleedyada jiiftadu ay yeelanayso 16 jaad. Sida uu Barwaaqo qirayo, furfurista hindisaha macallimiinta waa ay bannaantahay, mana odhan karno hindisaha Abwaan Gaarriye ayaa ka *mucweyn* hindisaha B.Sarae. Carraale oo waa is-maqiiqis sal la'. Waayo hindisaha B.Sare. Carraale ayaaba si' hufan, oo nidaamaysan, u qaabeenaysa dhammaan meerisyada jiiftada toosani yeelan karto sida hoos ka muuqata.

Jiiftada toosani waxa ay leedahay 9 shaqal, oo uu shaqal xundhur ihi badhtanka ugu jiro. Waxa ayna jiiftadu leedahay jaan ah: W W V W W (waana: waax + xubin togan, haddii aan isticmaalmo eray-bixinta culimada Jabuurti). [Guud ahaan, maansooyinka *toosan* waa kuwa ay jaantoodu u dhigantahay qaabka: W W V, W W V W, W W V W W, W W V W W V, i.w.m. Sababta oo ah waa in ay xundhurta meerisku kala

Copyright © 2010 WardheerNews.com

degtaa hogagga 5aad, 10aad, 15aa illaa hogga 20aad, ee aysan meelo kale degin.] Haddaba aan furfurno jaanta jiiftada annaga oo adeegsanayna hindisaha ama aragtida B.Sare. Carraale:

Shan-affare (5,4): 1 qaable

0. W W V W W -- Dhoodaan dawaafkii

Lix-saddexaale (6,3): 4 qaable

1. V V W V W W -- Abbayaal awowyaal
2. W V V V W W -- Waad heli abaalkaa
3. W W V V V W -- Ay doog leh ku ekaa
4. W W V W V V -- Deelqaafka ceebtiyo

Toddoba-labaale (7,2): 6 qaable

1.2. V V V V V W W -- Ma wax lagu dulleystaa
1.3. V V W V V V W -- Wax ag yaala ma arkaa
1.4. V V W V W V V -- Isbud soo akeekama
2.3. W V V V V V W -- Oogada mid kaga bood
2.4 W V V V W V V -- Daalalleyna raacshaye
3.4 W W V V V V V -- Daadduunka weheshaday

Siddeed-halle (8,1): 4 qaable

1.2.3 V V V V V V W -- Alalaxiyay Calidhuux
1.2.4 V V V V V W V V -- “Adi” yidhi “Allow” mahad
1.3.4 V V W V V V V V -- Amma loo dildila rogay
2.3.4 W V V V V V V V -- Duudsiga xad-gudubkiyo

Sagaal-eberre (9,0): 1 qaable

1.2.3.4. V V V V V V V V V -- Eri haqab ul lala dhaco

Lix iyo tobankaas jaad ee meeris-saleed iyo 16 meeris-farcameed ayey jiiftada toosani ku suurtoobi kartaa (ahna 32 qaab dhammaantood).

7. Waxa uu qodobkan toddobaad Barwaaqo ku sheegay in aysan hindisaha B.Sare. Carraale lahayn qaab xisaabeed oo lagu falanqayn karo kala gedisnaanta meerisyada maansada, isaga oo hindisaha Abwaan Gaarriye uun garabka saaray. Illaa haddeer, sida qoraalkan ka muuqata, hindisaha B.Sare. Carraale waxa ay ku giijisantahay isticmaalka tirooyinka xisaabta si’ loo darso kala gedisnaanta laamaha maansada—hindisaha B.Sare. Carraale ma kala qaadqaadayso tirooyinka oo dhan, ee isku duubni ayey muunad u wada galinaysaa, si’ uu meeriska farraarkiisu magac u yeesho, sida: siddeed affare, i.w.m. Dusha ayeyna ku cadyihiin maansooyinka ay hindisaha B.Sare. Carraale kala asoorto.

8. Qodobkan ugu dambeeya, oo uu Barwaaqo ku sheegay in aragtida B.Sare. Carraale ay maansooyinka isku murginayso, wali waa khaladaadka ah isku dhex laaqidda awoodda hindisaha B.Sare. Carraale iyo adeegsigeeda ee uu Barwaaqo ina tiimbinayo. Marka hore, awoodda hindisaha B.Sare. Carraale nagama daahna. Haddaan dhab ugu fiirsannona, xeerka uu B.Sare. Carraale helay waa mid mar kastaba

Copyright © 2010 WardheerNews.com

shaqaynaya, shaqadiisuna tahay in uu maansada ka sooco tixda, isla markaasna maansada laaxinka ka midha-guro. Waxa kale oo uu xeerkani awood u yeeshay isu-soocidda iyo kala soocidda maansooyinka. Sidaas awgeed, xeerka uu dejiyey B.Sare. Carraale khalad ma gali karo, haddii uusan naxwaha af-soomaaligu is badalin!

Dhanka kale, adeegsiga xeerkan khaladaad waa ay ka iman karaan, ruuxa aan khabiirka ku ahayn xeerkanna in badan khalad wuu galayaa. Balse Barwaaqo oo tilmaamaya khaladaad "is-mood-siis-ah" oo loo xambaariyey aragtida B.Sare Carraale, kuna muujisan heesaha hoose, ayaa yidhi:

> Borof. Carraale waxa kale oo uu innoo sheegay in heesaha wiglo, hirwo, iyo dhaanto isku mid yihiin. Arrintaana, sida uu sheegay, waxa gacan weyn ka siiyey ninka la yidhaa Cali Maxamed Oday (Cali Eydh). Hase ahaatee, Ibraahin Hawd baa arrintaa ku adeegsaday aragtida Carraale. Isaga oo arrintaasi ka hadlayana wuxu yidhi:
>
> *Heesaha kale ee sida kuwaas hore iyagaoo isku mid ah kala jaadka la moodo waxaa ka mid ah kooxdan iswadata luuqdase lagu kala yidhaahdo:*
>
> ***b) Wiglo:***
> *10:4 Balaayo rag baan u badiyaayoo = 14*
> *9:3 Birtay nimay gaadhay baan ma leh = 12*
> ***t) Hirwo:***
> *11:3 Anigu hirwo haabigeed ma hayee = 14*
> *9:3 Haweennada haygu soo jebin = 12*
> ***j) Dhaanto:***
> *10:4 Cayaar anan joogin cawdubillee = 14*
> *9:3 Miyey carfi caado lee dahay = 12*

Barwaaqo haddaba si' uu u saxo khalad-is-mood-siis-kii-saas ayaa waxa uu u soo bandhigay miisaanka heesahaas sidatan:

> **Wiglo:**
> Hadduu balankii dhab kaa yahay
> (1) 2 1 1 2 (1) 2 1 1 = 12
> Biyaan jirin been ku soo sheeg
> (1) 2 1 1 2 (1) 2 2 = 12
> **Hirwo:**
> Hadduu balankii dhab kaa yahay **eey**
> (1) 2 1 1 2 (1) 2 1 1 **2** = 14
> Biyaan jirin been ku soo sheeg**eey**
> (1) 2 1 1 2 (1) 2 2 **2** = 14
> **Dhaanto**:
> **Naa** hadduu balankii dhab kaa yahayeey
> **2** (1) 2 1 1 2 (1) 2 1 1 = 16
> **Hooy**, biyaan jirin been ku soo sheegeey

Copyright © 2010 WardheerNews.com

2 (1) 2 1 1 2 (1) 2 2 2 = 16

Heello:

1. Arooryada hore daruur onkoddiyo
(1) 2 1 1 1 1 (1) 2 1 1 1 1 = **14**
Ufada roobku way udgoontahay
(1) 1 1 2 1 1 (1) 2 1 1 = **12**

Haddaba, sida xaqiiqadu tahay, heesahaasi wax farqi ah oo u dhaxeeya ma jirto. Midiba mid ayey ka xuub-siibatay sida taariikhdu dhigayso. Bal u fiirsoo, maxaa faraq ah oo miisaankooda ka dhex jira. Sida uu Barwaaqo tilmaamayo, ee in ay heesahaasu kala shaqallo badanyihiin ayaa ah khaladka ugu horreeya ee lagu kala fogeenayo heeso isku mid ah. Sida jirtana khaladkan uu Barwaaqo ka mas'uulka yahay ayuu u xambaariyey aragtida B.Sare Carraale, isaga oo leh: "Hadal iyo dhammaantii waxa halkaa inooga cad inay heesaha wiglo, hirwo, dhaanto iyo heello aanay isku qaab dhismeed ahayn sida ay Carraale iyo Hawd isku raaceen. Qodobkanna sidaasi ayey aragtida Carraale wax isugu murgineysaa." Allay-na-lehe, aragtida Abwaan Gaarriye ee aan miyirka loo daaddahayn ayaa dhalinaysa kala qoqobnaanta heeso isku wada miisaan ah!

Haddaba, sidee ayey u xallin lahayd aragtida B.Sare. Carraale khaladkaas isaga ah?

B. Allannada ah horgallada meeriska sida: Naa, iyo Hooy, *kamid* ma'aha xididka meeriseed ee loo danleeyahay, balse waa alano ay keento ortu (luuqda, i.w.m). Sidoo kale, dibyaallaada: Eey iyo Oo, waajib kuma aha dhuuxa meeriska maansooyinkaas, oo iyagana waxaa meesha soo gelisa luuqda. Si kale haddii loo dhigo, haddii la jiibinayo heesahaas, labadaba alan-ladh hor iyo gadaalba waa ay bannaanyihiin. Ee maxaa haddaba maansooyinkaas *qaab dhismeedkooda* kala duway?

T. Dhanka miisaamista, waxa habboon in dhuuxa meeris walba la miisaamo, kadibna intii alan ah ee faqad ahna qaws la'iskaga xidho.

J. Sidoo kale, waa in aan ogaannaa in maansooyinkani ayen ahayn kuwa toosan. Sababta oo ah, bal eeg jaanta u dhigan maanso kasta oo dhaanto ah:

(W) V W W W V W W (W)

Waxaana tusaaluhu yahay:

(10,4) Ayaamaha khayrka lay dhalatoo
(10,4) Inkaar ma le Aamminoo kale (eey)

Haddaba, yaa odhan kara labadaas meeris ee kore ayaan dhaanto ahayn?[8] Sida dhabta ah, meeris walba oo dhaanto ah waxa uu leeyahay 14 shaqal. Saddexda maanso ee heellada, wiglada, iyo hirwaduna waa lamid dhaantada, dhuux ahaan.

Ka soo qaad, sida Barwaaqo u qaabeeyay ayey heesahani ku saxsanyihiin. Isweydiintu waa, aragtida B.Sare. Carraale miyey wax isku murgisay misa qofka si' u adeegsaday aragtidaas ayaa wax isku murgiyey

Copyright © 2010 WardheerNews.com

(inkastoonan aamminsanayn in uu jiro qof wax isku murginaya, waxa aan ka ahayn qof wax kala qoqobaya)?

Gabagabadii, waxa inoo cad in labada aragtiyood ee aan qoraalkan ku taabtaabtay ay si' is le'eg uga qayb-qaataan mucda MMS, isla markaasna ay ceelkaas MMS ay labaduba ku wada aroorayaan. Waxaana inoo cad in xeerka uu hindisay B.Sare. Carraale uu si' hufan u lafa gurayo mucda Miisaanka Maansada Soomaaliyeed. Sida uu B.Sare. Carraale ku dooday[9], hindisihiisa ayaa ka *akaadamisan* ta' Abwaan Gaarriye. Haddaba, kala sarraysiinta labada aragtiyoodi ma jirto, kol hadday faraqa iska haystaan marka furfuris lagu sameeyo e, ee yaan la isdaalin. Ogaalna waa in maydhaxda labadan aragtiyood ee aan la diiran ay ka badantahay dhawrkaa farood ee maraqa ah ee aan qoraalkan ku gugujiyay.

W/Q Idiris Cali
Email: idkaduula@gmail.com

Raad-raac:

Jidhidhico: "Suugaanta," "Maansada," "Sarsarka," iyo "Gabayga." <http://jidhidhico.wordpress.com>

Cabdi, Siciid Cabdillaahi: "Af-Haaneedka Soomaaliga." October 1, 2008. <http://af-haaneed.blogspot.com>

Siciid Saalax Axmed. "Hilinka Suugaanta & Hal Abuurka Minnesota 7." Youtube. July 24, 2009.
<http://www.youtube.com/watch?v=-UvtdVpMsiE>

Guuleed, C/laahi Diiriye "Carraale": *Gorfaynta Gabayga*. Marka,1976.
<http://wardheernews.com/Books/Carraale/Gorfaynta_Gabayga.pdf>

Martin Orwin and Maxamed Cabdullaahi Riiraash: "An approach to relationships between Somali meter types."
African Languages and Cultures, Vol. 10, No. 1 (1997), pp. 83-100 (article consists of 18 pages)
<http://www.jstor.org/stable/1771816>

Cabdi Miigane Guuleed & Maxamed Cabdillaahi Riiraash: "Habka Dhismaha Maansada Soomaaliyeed."
<http://www.redsea-online.com/modules.php?name=getcontent&contenttype=news&id=37>

C/raxmaan F. Barwaaqo: "Aragtida Carraale iyo ta Gaarriye ee miisaanka maansada iyamaa mucweyn?" 2/24/2010.
<http://www.somalilandstudies.com/images/stories/pdfs/Aragtida-Gaarriye.pdf>

[1] Habkan aan u kala dhig-dhigayo abla-ablaynta afka waxa ka sii muc weyn habka af-haaneedka ee ku xagan

Copyright © 2010 WardheerNews.com

saabka: http://af-haaneed.blogspot.com/2008/10/abla-ableynta-afkaclassification.html

[2] Eeg hordhaca Merriam Webster Collegiate Dictionary, 10th Edition.

[3] Eeg qoraalka Siciid C. C/laahi ee Af-haaneedka Soomaaliga.

[4] Eray boos-celis ah; kana yimid erayga "soog" oo macnihiisu yahay "kala jiidan" amma "aan shushubnayn."

[5] Daalaco: Siciid Saalax Axmed. "Hilinka Suugaanta & Hal Abuurka Minnesota 7." Youtube. July 24, 2009. <http://www.youtube.com/watch?v=-UvtdVpMsiE>

[6] Ka daalaco waraaqda oo ku magacaaban, "An approach to relationships between Somali meter types," rugaha-saabka ee http://www.jstor.org/pss/1771816

[7] Eeg C/Raxmaan F. Barwaaqo: "Aragtida Carraale iyo ta Gaarriye ee miisaanka maansada iyamaa mucweyn?"

[8] Dhagayso waraysiga BBCdu la yeelatahay Maxamuud Diiriye F. "Baal-Baal" ee ku duuban cajalka ku magaacaban "Aano-Dheer" ee ku naban rugaha-saabka ee Golkhatumo.com.

[9] Ka eeg doodda u dhaxaysa labada macallin jiidmada: < http://www.youtube.com/watch?v=4rUxZfxpaBs>

Copyright © 2010 WardheerNews.com